# Saint Paul Public Schools: Miisaaniyadda 101 ee Degmada SPPS

Ka-qaybgalka Qoyska ee Kulamada Miisaaniyadda
Sannad-Dugsiyeedka 2025 (FY25)
October 2023

# Ka Saint Paul Public Schools ahaan, qof walba wuxuu leeyahay hadaf isku mid ah.

Si...

- loo dhiirrigeliyo ardaydeena inay si maanshiil leh u fekeraan
- inay ka dhabeeyaan riyooyinkooda mustaqbalka iyo
- inay dunida wax ka beddelaan



**Yaa bixiyo qarashka wax walba?**

**Xaggee ka timaaddaa lacagtu?**

**Sidee loo isticmaalaa lacagta?**



## Dakhliga Guud

## Kharashaadka

Fikrad ahaan, macnaha miisaaniyad dheellitiran waa mid aad u fudud... taasoo ah lacagta soo xaroota waa inay u dhiganto lacagta baxaysa

# Maxaa saameeyo miisaaniyadda degmada?

Amarrada maamullada heer gobol ama heer degmo

Canshuurta laga helo hantida maxalliga ah

Qaaciidooyinka maalgelin ee heer maamul gobol iyo heer federaal

Heshiisyada qandaraaska shaqaalaha

Lambarada ardayda diiwaangashan

Saint Paul PUBLIC SCHOOLS



# Xaggee ka timaaddaa lacagtu?
















Lacagta laga helo ilahan waxaa la socdo shuruudo, ama xayiraado, ku aaddan sida ay SPPS u isticmaalayso lacagtaas.



# Sidee loo isticmaalaa lacagta?

# Sidee loo isticmaalaa lacagta?

**ADEEGYADA/MASHAARIICDA/DEYMAHA MUDDADA DHEER AH**



- Food Service (3%)
- Community Service (3%)
- Building Construction (11%)
- Debt Service (5%)



- General Fund (78%)

**LACAGAHA LOO QOONDEEYAY WAXBARASHADA GUUD EE AASAASIGA AH EE FASALLADA K-12**

# Maxay qabataa lacagta MAALGELINTA GUUD ah?



- Administration Support Services (8%)
- Student Programs & Services (76%)
- Maintenance Operations, Equipment & Other Fiscal Expense (16%)

# Qorshaha Gargaarka Mareykanka (ARP)

# Sanduuqa Gargaarka Degdegga ah ee Dugsiyada Hoose iyo Kuwa Sare (ESSER)

# Waa maxay lacagta ARP/ESSER?

Waa doollarka gargaarka degdegga ah ee loo qoondeeyay iskoollada heer degmo si looga caawiyo degmooyinka inay bixiyaan adeegyo (nafaqo, taageeridda caafimaadka dhimirka ah, taageeridda xagga tacliinta, casriyeynta dhismayaasha, iwm) intii lagu jiray saf-markii COVID-19 iyo wixii ka dambeeyayba.








# Saameynta maalgelinta ARP/ESSER markii ay dhammaato sannadka 2024

- Degmadu waxay hadda haysataa miisaaniyad dhan $ 114.2 milyan oo loogu talagalay in sannadka 2024 (FY24) lagu bixiyo jagooyinka, adeegyada, iyo barnaamijyada iyadoo la adeegsanayo maalgelinta ESSER III (ARP).



- Lacagahan federaalku waxay **dhammaan doonaan** bisha **September 2024**, oo degmaduna mar dambe ma heli doonto dakhligan inoo socday.



Saint Paul Public Schools

# Carqaladaha iyo Hawlaha Miisaaniyadda Sannad-Dugsiyeedka FY25 iyo Wixii ka Dambeeyo

- Iyada oo ku saleysan miisaaniyadda FY24 (oo uu ansixiyay Guddiga Waxbarashada bishii June 2023), degmadu waxay qorsheyneysaa inay isticmaasho lacag dheeri ah oo aan laheynin oo lagu kabayo kharashaadka miisaaniyadda FY24 **$ 34.4 milyan**. Haddii sidaa loo daayo oo aan wax laga qaban, taasoo ay u sii dheertahay sicir-bararka, hoos u dhacani wuxuu gaari doonaa **$ 36.1 milyan** sannadka FY25.
- **Sidaa awgeed, iyadoo lagu saleynayo xogta hadda jirta, degmadu waxay wajihi doontaa ugu yaraan $ 150.3 milyan oo hoos u dhac miisaaniyadeed ah sannadka FY25.**

Saint Paul PUBLIC SCHOOLS


Q
A

# Xogo Dheeraad ah

- Xogaha Miisaaniyadda SPPS: spps.org/budget
- Lacagaha degmada SPPS ee ARP/ESSER: spps.org/arp